ICRC

## SOOMAALIYA

# XAQIIQOOYINKA IYO TIROOYINKA

## JANNAAYO – DISEMBER 2018



**ICRC waxay Soomaaliya ku leedahay taariikh dheer oo dabooleyso muddo 35 sano oo ay ka jawaab celinsay colaadda iyo gargaarka bani'aadamnimada ah. Hawlaheeda waxaa ka mid ahaa booqashooyinka maxaabiista intii lagu guda jiray dagaalkii Ogaadeen iyo Itoobiya (1977-1978) iyo sidoo kale hawlgalo gargaar ballaaran oo deg deg ah intii lagu jiray dagaalkii sokeeye ee dheeraa iyo abaarta la xiriirtay cimilada ee horraantii 1990-meeyadii. ICRC waxay sii waddaa caawinta dadka dhibaatada ka soo gaartay isku darka khilaafaadka hubaysan oo sii dheeraaday iyo dhibaatooyinka cimilada adag sida abaaraha iyo daadadka. Gaar ahaan xaaladdii dhacday sanadkii 2017-kii halkaas oo abaarta ba'an ay saameysay inta badan dalka oona sababtay dhibaato bani'aadamnimo oo ballaaran.**

ICRC waxay si dhow ula shaqeysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) si ay uga jawaabto baahiyaha bani'aadamnimada iyada oo bixisa cunto si degdeg ah, biyo nadiif ah, abuur iyo qalabka beeraha iyo tallaalka xoolaha. ICRC waxay sidoo kale bixisaa tababarka gargaarka degdegga ah, waxayna ka shaqeysaa dib-u-soo celinta xiriirka xubnaha qoyska kala maqan, waxay booqataa goobaha xabsiyada ah, waxayna ku dhiirisaa xeerka caalamiga ee bani'aadamnimada (IHL) mas'uuliyiinta iyo dadka ku habboon.

Sanadkii 2018-kii ICRC waxay ku khasbanaatay in ay yareyso qaar ka mid ah hawlaha gargaarka ayna joojiso hawlihii ay ka wadday goobaha xabsiyada ka dib markii ay soo baxeen walaacyo dhanka ammaanka iyo aqbalaadda guud ee hay'adda ee goobaha ay ka shaqayso.

### QAYBAHA MUHIIMKA AH:

- In ka badan **461,000** qof ayaa heley cunto iyo lacag caddaan ah
- In ka badan **147,000** Farriimaha Laanqaryta Cas iyo wicitaanada telefoonka oo u dhaxeeya xubnaha qoyska ayaa loo fududeeyey
- Dalka oo dhan waxaa la booqday **3,736** oo maxaabiis ah
- In ka badan **361,000** qof ayaa ka faa'iideystey dhiirigelinta fayo-dhowrka
- In ka badan **540** qof ayaa IHL lagu wargaliyay
- Waxaan bixinnay qalab iyo daawooyin tayo leh oo loo fidiyay **4** isbitaal iyo **32** xarumo caafimaad ee SRCS, kuwaas oo ka faa'iidaystay **553,903** bukaanno

Intii lagu guda jiray sanadka, ICRC waxay fulisay barnaamijyada soo socda:

## BIXINTA GARGAARKA DEGDEGGA AH IYO DIB-U-SOO CELINTA HAB-NOLOLEEDKA

Qalalaasaha hubaysan wuxuu inta badan burburiyaa hab-nololeedka iyadoo qoysasku lagu khasbaayo in ay ka tagaan beerahooda ama xoolahooda, dalagyadana way baabi'aan. ICRC iyo Ururka Bisha Cas waxay bixiyaan gargaa degdegga ah, sida cuntada, waxyaabaha muhiimka u ah qoyska, isla markana waxay ka shaqeeyaan dib-u-soo celinta hab-nololeedka.

- Taageero dhaqaale ayaa la siiyay in ka badan **259,000** qof iyadoo la bixiyay gargaar lacag caddaan ah, shaqo lacag ku bedelasho, deeq lacageed, boono badeecada lagu qaato, lacag caddaan ah oo loogu talagalay cunto iyo deeq xoolo
- Intii lagu guda jiray jawaab-celinta degdegga ah ayaa in ka badan **202,000** qof loo qaybiyey cunto
- Xirmooyin ay ku jiraan alaabta muhiimka u ah qoyska ayaa la siiyey in ka badan **163,000** qof
- Si loo dhiirigeliyo wax soo saarka cuntada ayaa dad kor u dhaafaya **9,000** la siiyey abuur iyo qalabka beeraha, matoorada waraabka iyo tababaro
- Waxaa gacan laga geystay ku xoojinta jiinka webiyada jawaano ciid lagu shubay oo ka faa'ideystay in ka badan **178,000** qof
- Iyadoo loo maraayo daaweynta xoolaha, xakameynta gendiga, tababarka caafimaadka xoolaha, bixinta xirmooyin ay ku jiraan qalabka caafimaadka xoolaha iyo xirmooyin ay ku jiraan abuurka calafka xoolaha ayaa **69,000** qof loo horumariyey xannaaneynta xoolaha
- Waxaa magaalada Xudur, gobolka Bakool laga dhisay **hal** xarun cusub oo caafimaadka xoolaha ah

## FUDUDEYNTA HELITAANKA DARYEELKA CAAFIMAADKA

ICRC waxay xarumaha caafimaadka ee heerka asaasiga ah iyo mid isbitaalka gaarsiisan ku taageertaa sahay daawooyin waxayna tababaro siisaa shaqaalaha caafimaadka si kor loogu qaado xirfaddooda daaweynta iyo maareynta dadka xarumaha soo gaaraya iyagoo qaba dhaawacyo ka soo gaara qalalaasaha hubaysan iyo sidoo kale dadka xanuunsan oo ku sugan goobaha colaadaha ka jirtaan. Waxaan sidoo kale taagernaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) si uu tababaro kuwa bixiya gargaarka degdegga ah oo ka tirsan bulshada si ay ka jawaabaan xaaladaha degdegga ah.

- **450** qof oo qaba dhaawacyo ka soo gaaray hubka ayaa lagu daaweeyay **12**-ka isbitaal oo ay taageerto ICRC-da
- Waxaa sahay daawooyn oo tayo sare leh loo fidiyey **4** isbitaal iyo **32** xarumo caafimaad oo ay maamusho SRCS waxaana qolka gargaarga degdegga ah (QG) ka faa'ideystay **31,475** bukaan (**11.3%** oo dhaawac hubka ah) oo heer isbitaal gaarsiisan iyo **522,433** qof oo loo fidiyey daryeelka caafimaadka asaasiga ah
- Labada xarumood ee xasiliinta oo ay taageerto ICRC ayaa barnaamijkooda daaweynta bukaan-socodka lagu daaweeyay **111,076** qof oo qaba nafaqo darro oo ay ku jiraan **25,803** carruur nafaqo-xumo daran haysay oo shan sano jir ka yar kuwaas oo la ildarnaa dhibaatooyin caafimaad
- **5** goobood oo xabsiyo ah ayaa loo hagaajiyey helitaanka daryeelka caafimaadka oo ka faa'ideystay in ka badan **11,770** qof oo la talinta koowaad ah la siiyay iyo daaweynta in ka badan **380** maxaabiis oo qabay nafaqo-xumo daran iyo mid dhexdhexaad ah kuwaas oo ku sugnaa **3** goobood oo xabsiyo ah
- La talin dhalashada horteeda ah ayaa loo fidiyey **41,715** haween, adeeg dhamlo ammaan ahna waxaa loo fidiyey in ka badan **810** haween waxaana la tallaalay **35,329** haween iyo 1**67,636** oo carruur ah
- Dhanka horumarinta dhismaha, **3** isbitaal ayaa la gaarsiiyey wadarta **578** sariirood
- Waxaa dib-u-dhisid lagu sameeyey **4** xarumo caafimaad oo ay leedahay SRCS
- Iyadoo lala kaashanaayo SRCS, ICRC waxay **35** tababar gargaarka degdegga ah u qabatay **863** qof
- **11** koox hawleed oo gargaarka degdegga ah, oo ka hawl gala Muqdisho, Gaalkacyo iyo Lascaanood, ayaa gargaarka degdegga u sameeyey **562** qof oo isugu jira kuwo dhaawac ah iyo kuwo xanuunsan iyo meydad gaaraya **74** oo la soo aruuriyey ka dib dhacdooyin khasaare badan dhaliyey

## FUDUDEYNTA HELITAANKA ADEEGYADA BIYO NADIIF AH IYO FAYODHOWRKA

Iyadoo hagaajineysa ayna dayactireysa nidaamyada biyo siinta ee jira, ICRC waxay ku dadaaleysaa in ay bixiso biyo nadiif ah. Intaa waxaa dheer, ICRC waxay SRCS ku taageertaa hirgelinta dhaqamada wanaagsan ee fayo-dhowrka dadweynaha ay saameysay cudurada ka dhasha biyaha.

- Mashaariic **26** ceel ah ayaa la dhammeystiray kuwaas oo biyo nadiif ah ay ka heleen ku dhawaad **105,000** qof oo ku sugan Soomaaliya
- In ka badan **41,000** qof ayaa ka faa'ideystay **23** mashruuc oo ah waraha lagu keydsado biyaha roobka
- Iyadoo taageero laga helaayo SRCS, waxaa la qabtay ololeyaal dhiirrigelinta nadaafadda oo ay ka faa'ideysteen in ka badan **361,000** qof iyada oo ku dhiirrigalinaysa ficillada nadaafadda wanaagsan
- ICRC waxay taageertay labo hawlgal biyo dhaamin ah oo ka faa'ideystay in ka badan **93,000** oo barakacayaal ah

---

## CAAWINTA HAGAAJINTA XAALADAHA NOLOLEED EE MAXAABIISTA

ICRC waxay booqasho ku tagtaa goobaha xabsiyada ah oo ujeedadiisu tahay in ay kormeerto la macaamilka iyo xaaladaha nololeedka ee maxaabiista. Natiijooyinka la arko ayaa si wadajir ah loogala hadlaa mas'uuliyiinta xabsiga oo aan lala wadaagin cid saddexaad. ICRC waxay taageertaa dadaalada mas'uuliyiinta oo ku aadan sidii loo heli lahaa heerar ku habboon oo ay ku noolaan karaan maxaabiista iyo ixtiraamka xuquuqdooda.

- Dalka oo dhan waxaa la booqday **3,736** maxaabiis
- Waxaa xaaladaha nololeed loo hagaajiyay **1,810** maxbuus oo ku xirnaa **4** goobood oo xabsiyo ah
- Waxaa la fuliyey hawlaha xakameynta cayayaanka waxaana kae la dhiirigelyey ficillada nadaafadda wanaagsan oo ka faa'ideystay in ka badan **3,100** maxaabiis
- **4,148** maxaabiis oo ku jiray **23** goobood oo xabsiyo ah ayaa ka faa'ideystay cunto tayadeedu la hagaajiyey iyo bixinta cunto dheeraad ah intii lagu guda jiray bisha barakeysan ee Ramadaanka

---

## DIB-U- SOO CELINTA XIRIIRKA QOYSKA

Dad badan ayaa ka lumay xiriirka xubnaha qoyskooda marka ay ka cararayaan colaadaha hubaysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase. Muddo sanado ah qaar ka mid ah qoysaska ayaa ka maqnaa kuwii ay jeclaayeen, sidaas oo kalena barakaca joogtada wuxuu maalin kasta abuuraya lumitaan cusub ee xiriirka xubnaha qoyska. ICRC-da Soomaaliya waxay la shaqaysaa Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) si loo helo xubnaha qoyska kala maqan, dibna loo soo celiyo lana joogteeyo xiriirka ka dhaxeeya.

- Iyadoo la is dhaafsaday **83,808** oo ah Farriimaha Laanqayrta Cas (RCMs), la fufudeeyay **63,785** oo wicitaano telefoon ah, adeegyo baafinta oo wax ka tartay helitaanka **2,615** shakhsi, iyo liiska "Dadka Maqan" ee barnaamijka idaacadda BBC Soomaali laga akhriyey magacyo gaaraya **6,122** ayaa, iyadoo taageero laga helaayo SRCS, gacan laga geysatay dib-u-soo celinta xiriirka ka dhaxeeya xubnaha qoyska

---

## FAAFINTA AQOONTA IYO U HOGGAANSAMIDA XEERKA CAALAMIGA EE AADAMINIMADA (IHL)

Xeerarka IHL-ka ujeeddadooda waa in lagu ilaaliyo aadanaha waqtiyada dagaallada hubaysan. Si loo yareeyo saameynta dagaallada iyo dhowridda dadka ay saameyeen, ayaa ICRC waxay la shaqeysaa saraakiisha ciidanka si loo faafiyo aqoonta IHL-ka iyo xeerarka kale oo loo adeegsado colaadaha iyo xaaladaha fulinta sharciga. Sidoo kale, waxay ku dhiirigelisaa barista IHL-ka **7** jaamacadood ee Soomaaliya.

- **20** sarkaal oo ciidanka ah, **40** kuwa hubka sita ah, **358** hoggaamiyeyaasha bulshada, **30** shaqaalaha ICRC ah, **20** mutadawicinta SRCS ah iyo **75** arday ayaa lagu wacyi-geliyey xeerka caalamiga ee aadaminimada
- **294** oo ah xubno cusub oo Ciidanka Asluubta dhowaan loo qortay ayaa lagu wacyi-geliyey heerarka caalamiga ah ee xabsi ku haynta
- Waxaa tababar ku saabsan maareynta meydka loo qabtay **30** shaqaale oo ka kala socda SRCS, Adeegga Ambalaaska Aamin, Isbitaalada Madiina iyo Keysaney, iyo kuwo kale oo ka shaqeeya gargaarka degdegga

---

## XAQIIJINTA ISLA-XISAABTANKA DADWEYNAHA DHIBAATADU AY SAAMEYSAY

Isla xisaabtanka dadweynaha dhibaatada saameysay ayaa muhiim u ah helitaanka aqbalaada iyo siyaabaha lagu gaari karo dadka dhibaateysan iyo hagaajinta hawlgalka hay'adda oo ku habboon baahiyaha iyo waxtarkeedaba. Marka ay tahay barnaamijyada gargaarka, xaqiijinta la sameeyo gargaarka ka hor iyo ka dib ma aha keliya in la ogaado oo laga hortago in gargaarka la leexsado, dejinta barnaamij tayadiisu hooseyo iyo hirgelintiisaba ayaa sidoo kale door muhiim ah ka qaadataa xaqiijinta in hawlaha aysan waxyelleeyaan ka faa'ideystayaasha.

**Xaqiijinta ka-faa'ideystayaasha:**

- **40,294** (**16%**) ka-faa'ideystayaal ah oo loo diiwangeliyey barnaamijyada wax-qabadyada ku saleysan lacagta caddaanka ah ayaa la xaqiijiyey ka hor inta aan la bixin lacagta
- **2,077** (**1%**) oo ka-faa'ideystayaal ah oo loo diiwaangeliyey cunto iyo gargaarka aan cuntada aheyn ka hor inta aan la qaybin

**Kormeerka qaybinta ka dib:**

- Marka laga soo qaato tusaale yar oo **6,277** ka-faa'ideystayaal ah (**2%**) oo lagu beegsanaayo waxqabadyada lacagta caddaanka ah, **91%** (**5,711** ka-faa'ideystayaal ah) ayaa xaqiijiyey helitaanka gargaarka
- Marka laga soo qaato tusaale yar oo **7,920** ka-faa'ideystayaal ah (**4%**) oo lagu beegsanaayo cuntada iyo waxyaabaha aan cuntada aheyn, **74%** (**5,880** ka-faa'ideystayaal ah) ayaa xaqiijiyey helitaanka gargaarka

**Xarunta xiriirka bulshada:**

- Qaybta jawaab-celinta telefoonka lambarka (**373**) oo lacag la'aanta ah ayaa war-celin laga heley in ka badan **8,300** oo ka-faa'ideystaal ah


Anisa Hussein/ICRC


Mohamed Abdikarim/ICRC


Mohamed Abdikarim/ICRC


Mohamed Bishaar/ICRC


Anisa Hussein/ICRC


Anisa Hussein/ICRC


Anisa Hussein/ICRC




facebook.com/icrc
twitter.com/icrc_Africa
instagram.com/icrc_afrique

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Somalia offices in Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa and Hudur.
www.icrc.org
© ICRC, Jannaayo 2019

ICRC

Badanaa iyadoo la shaqeyneysa la hawl-galayaasheeda Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas, ICRC waxay dadka ku nool adduunka oo dhan oo ay saameysay colaadaha hubeysan iyo qalalaasaha kale u qabataa wax kasta oo ay awooddoo iyadoo ku caawisa sidii loo dhawri lahaa sharaftooda iyo iyadoo ka yareyneysa dhibaatadooda. Ururku asagoo horumarinaya xoojinayana xeerka bani'aadamnimada iyo u doodaya mabaadii'da caalamiga ee bani'aadamnimada ayaa wuxuu kaloo isku hawlaya inuu ka hortago dhibaatada.

2019 0943/402 02.2019